AUSCO

Barnaamijka Tilmaan-siinta Dhaqaneed ee Australia

# Xuquuqda iyo shuruudaha shaqo-helidda

Ka shaqaale ahaan Australia, waxaad leedahay xuquuq la yaqaan kuwaas oo damaanad-qaadaya mushaharka ugu hooseeya, gunnooyinka, dul-socodka, qiyaasta ganaaxa, saacadaha shaqada, fasaxa xanuunka, ammaanka goobta-shaqada iyo waxyaalo badan. Kuwaas waa u kala duwan yihiin dowlad-goboleedyada kala duwan sidaas darteed waxaad u baahan tahay inaad weydiiso loo-shaqeeyahaaga wixii faahfaahin gaar ah. Waxaad kaloo weydiin kartaa qofka proposerkaaga ama caseworkerkaaga wixii ku saabsan xuquuqda qofka shaqaalaha ah markii aad shaqo bilowdo. Waxaad xaq u leedahay inaad ka mid noqoto ururada shaqaalaha.

## Shuruudaha shaqo-helidda

Shaqooyinku waxay yeelan karaan xaalado kala duwan. Shaqadaadu waxay noqon kartaa mid joogto ah, taas oo macnaheedu tahay inaad helayso manfacyada sida fasaxa xanuun iyo lacagta fasaxyada, ama shaqada mar-laha ah, taas oo macnaheedu yahay waxaa keliya lacag lagu siinayaa saacadaha aad shaqayso. Waxaa laga yaabaa inaad shaqayso waqti-buuxa ama waqti-dhiman, inta saacadaha shaqadu socdaan ama habeenkii. Waxaa muhiim ah inaad qaadato shaqada haddii aad shaqayn karto saacadaha loo baahan yahay marka lagu daro masuuliyadda qoyskaaga ama waxbarashadaada. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.fairwork.gov.au

## Ka-jarista mushaarka

Ka-jarista mushaarka waxaa loo sameeyaa canshuurta dakhliga, superannuation-ka, ururka shaqaalaha (Haddii aad xubin ka tahay ururka) iyo manfacyo kale. Weydii loo-shaqeeyahaaga in si cad laguugu sharxo wax-ka-jiristaada markii aad shaqada bilowdo. Waxaad kaloo dooran kartaa in lacagta si atoomatik ah looga jaro mushaarkaaga si aad ugu bixiso biilasha qaarkood (tusaale lacagta kirada, korontada).

## Superannuation

Superannuation-ka waa mashruuc kayd ah oo loo-shaqeeyeyaalku ay siiyaan shaqaalahooda si loo hubiyo in dadku haystaan lacag ay ku noolaadaan markay howlgab noqdaan. Waa u caadi dadka inay joojiyaan shaqada ama ay 'ka-fariistaan' markay gaaraan 60-65, in kastoo da'dan ay kala duwanaan karto. Ku dhawaad qof kasta oo shaqeeya waa inuu ka mid noqdaa superannuation-ka ama kaydka 'super'. Sharci ahaan, loo-shaqeeyuhu waa inuu ku shubaa qadar lacag ah ee dakhliga qofka shaqaalaha ah kaydka superannuation-ka. Shaqaaluhu ayaguna way dhigan karaan lacag dheeraad ah kaydkooda super-ka. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg:

- www.ato.gov.au/super/
- www.moneysmart.gov.au/superannuation-and-retirement

## Caafimaadka Shaqada iyo Ammaanka

Dowlad-goboled iyo taritoori kastaa wuxuu leeyahay shuruuc si loogu dhowro shaqaalaha goobta shaqada. Shuruucdan waxaa ka mid ah siinta beya'dda shaqo ammaan ah oo leh tas-hiilaadka daryeel ku filan ku-tababaridda shaqaalaha wax ku saabsan qataraha waaweyn ee goobta shaqada, la-socoshada cafimaadka shaqaalaha iyo siinta dad aqoon leh inay siiyaan talooyin caafimaad iyo ammaan. Dhammaan shaqaaluhu waa inay raacaan habraacyada caafimaadka iyo ammaanka ee loo-shaqeeyahooda. Taasna waxaa ka mid ah iskaashi la-samaynta maamulka, xirashada dharka wax-celiya iyo hubinta in falkooda goobta shaqada uusan qatar-gelin naftooda ama tan dadka kale. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.safeworkaustralia.gov.au

Australian Government
Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya'dda Caalamiga ee Socdaalka ayadoo ka wakiila Wasaaradda Australia ee Adeegyada Bulshada

IOM • OIM